


Tallaalka looga hortago fayraska korona

Fayraska korona wuxuu sababaa jirrada ku dhacda mariinada neefsashada. Dadka badidooda ma dareemaan wax calaamado ah ama waxay dareemaan calaamado fudud, laakiin dadka qaarkood si xun ayay ugu xanuunsadaan. Tallaalka fayraska korona wuxuu ka hortagaa jirro daran iyo dhimasho.



Tallaalka looga hortago fayraska korona waxaa lagula talinayaa

- 75 sano jirka ama ka da'wayn
- degan hoyga waayeellada
- da'dooda u dhaxayso 18 ilaa 74 sano oona ka tirsan kooxaha cudurka halis u yahay
- carruurta qaba cudur halis ah

Xitaa dadka caafimaadka qaba oo da'dooda u dhaxayso 65–74 sano waxay qiimo jaban ku heli karaan tallaalka looga hortago fayraska korona waa haddii ay rabaan

Kooxaha cudurka halis u yahay waa dad qaba cudurrada qaarkood ama xaalad oo sare u qaadi karto, halista in si darran ugu xanuunsadaan korona. Haddii aadan hubin in adiga ama ubadkaaga aad ka tirsan tihiiin kooxda u fayraska halis u yahay, waxaad warbixin faahfaahsan ka akhirsan kartaa bogga internetka ee fhi.no ama waydii dhakhtarkaaga. Badbaadada

aad tallaalladii hore ka heshay ama xannuunkii ayaa hoos u dhacda waqti kadib. Sidaas darteed Machadka Caafimaadka Dadweynaha ee dalka Norway wuxuu talo ahaan soo jeedinayaa in dadka halista ugu jiro si darran ugu xanuunsadaan cudurka COVID-19 ay xilliga qaboowaha iska tallaalaan cudurka

Isku mar cudurra ma laysaga tallaali karaa?

Haa, tallaalka looga hortago fayraska korona iyo tallaalka looga hortago influensada iyo pneumococci isku mar ayaa layska tallaali karaa.

Waxtarka tallaalka ma heer sare miyaa?

Tallaalka wuxuu aad ugu hortaga halista cudurka COVID-19, laakiin muddo gaaban ayuu ka hortaga qaadsiiinta ama faafinta qaadsiiinta.

Tallaalka ma leeyahay waxyeellooyin?

Dhammaan daawooyinka iyo tallaallada waxay sababi karaan waxyeellooyin, laakiin qof kasta ma dareemo waxyeellaha. Waxyeellooyinka waxay dhacaan maalmaha ugu horreeya

tallaalka kadib, badanaa waa kuwo fudud ilaa dhexdhexaad ah waxayna baaba'aan dhowr maalmood ka dib. Dadka qaarkood waxay dareemi karaan calaamado aad u darran. Waxyeellooyinka ugu badan waa xannuun iyo barar goobta tallaalka, daal, madax-xanuun, shuban, muruq-xannuun, qarqaryo, daal, xannuun kala-goysyada iyo qandho. Waxyeellooyinka halista ah waa naadir. Waxyeellooyinka halista ah waa kuwo naadir ah. Mas'uuliyiinta adeegyada caafimaadka si joogto ah ayay ula socdaan waxyeellooyinka tallaallada dhammaantood.

Halkee iska tallaali karaa?

Warbixin ku saabsan goorta iyo halka aad iska tallaali karto ka akhriso barta internetka ee dowladda hoose.

Warbixin faahfaahsan ma u baahan tahay?

Kala xirii dhakhtarkaaga ama shaqaalaha adeegyada caafimaadka.



Warbixin faahfaahsan ka akhriso barta internetka fhi.no/voksenvaksinasjon